

Macluumaad ku saabsan hawl-socod siinta xogta

Hawl-socod siinta sawirka loogu talagalay ujeeddooyin ilaalin

sida waafaqsan qodobka 13 iyo 14 ee Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DSGVO)

Magaca iyo faah-faahinada xiriirka ee ilaaliyaha:

Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl (Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka)

Modecenterstraße 22, 1030 Wien

Teleefoonka: +43- 59 133 98 7004

Faakiska: +43- 59 133 98 7399

li-maylka: BFA-Einlaufstelle@bmi.gv.at

Faah-faahinada xiriirka ee shaqaalaha ilaalinta xogta:

Teleefoonka: +43- 59 133 98 0

li-maylka: BFA-Datenschutzbeauftragter@bmi.gv.at

Ujeeddooyinka loogu talagalay hawl-socod siinta midaas oo loogu danleeyahay xogta shakhsiyeed:

Sawir qarsoodi ah oo sawiraya gelida ay ku jirto gelida meesha dhismaha maamulka saacadaha ay furantahay midkaas oo si khaas ah looga isticmaalo dhinaca hay'ada dadweynaha sharciga ah ee ah sida ilaaliyaha; ama gelid kale oo gooni ah oo ay ku jirto gelida meel boos ahaan ka baxsan qaybta dhismaha looga isticmaalo si-aan khaas ahayn ee ah sida dhismaha maamulka (tusaale ahaan. dhismaha barkeeda, hal door) dhinaca hay'ada dadweynaha sharcigaa ah ee ah sida ilaaliyaha, sidoo kale wajiga dhismaha maamulka laga leeyahay dhinaca hay'ada dadweynaha sharciga ah ee ah sida ilaaliyaha hawl-socod siinta sawirka, ama loo arko in ay mas'uul kayihiin wax kasta oo bur-bur ah oo gaara wejiga dhismaha maamulka, midaas oona ay tahay ujeeddo ilaalin hantida ah iyo ilaalinta hantida, nolosha iyo caafimaadka dadka si sharci ah xiriir ula leh maamulka qandaraaska, kahortaga, xadeynta iyo xalinta wax kasta oo ficilo dembi oo suurtoagal ah, sidoo kale mas'uuliyadaha saaran maamulka qandaraaska ay yihiin kuwo sidaasi saamayn ku gaarayso, oona kaliya la falan-qeeyo marka ladaabakhi karo sida looga qeexay dhinaca ujeeddada, halkaas oo sawirka la oggolaaday in la qaado uu raacayo qodobka 12 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG).

Aasaaska sharciiyeed ee loogu talagalay hawl-socod siinta:

Qodobka 12, 13 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG); qodobka 353 ff iyo qodobka 1157 ee Qaanuunka Rayidka (ABGB); qodobka 3 ee Qaanuunka Ilaalinta Shaqaalayaasha Rayidka ee Federaalka (B-BSG); qodobka 80 ee Qaanuunka Hawlaha Dembiyeed 1975 (StPO)

Muddada la keydin doono xogta shakhsiyeed:

72 saacadood haddii aan xogtaasi loogu baahnayn ujeeddada loo qaaday ama loo sawiray

Qaybaha dadka qaatayaasha ah ee qaata xogta shakhsiyeed:

Maamul u qalma waxaa ku xiga maxkamad u qalanta (ee loogu talagalay ilaalinta daliilka xaaladaha dembiyeed); wakaalado ammaan (loogu talagalay ujeeddooyin sirdoon);

maxkamado (loogu talagalay ilaalinta daliilka xaaladaha rayidka), shirkado dammaano (loogu talagalay kaliya xalinta cabashooyinka ceymiska)

Xuquuqaha qofka xogta:

Xaqa loogu soo gudbiyo cabasho Maamulka Ilaalinta Xogta Austariyan (1030 Wien, Barichgasse 40-42, teleefoonka +43 1 52 152-0, ii-maylka dsb@dsb.gv.at) waxaa lagu dabakhayaa sida waafaqsan qodobka 24, cutubka 1 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG).

Xaqa gelida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 15 ee DSGVO.

Xaqa sixida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 16 ee DSGVO.

Xaqa tirida ('xaq loo leeyahay in la iska iloobo') waxaa lagu qoray qodobka 17 ee DSGVO.

Midna ma ahan wax xaq ah oo lagu diido sida waafaqsan qodobka 21 DSGVO ama wax xaq oo lagu xanibayo hawl-socod siinta xogta sida waafaqsan qodobka 18 DSGVO kuwo lagu dabakhi karo hawl-socod siinta xogta shakhsiyeed sida waafaqsan Qaanuunka Federaalka ee ku saabsan Siinta Daryeelka Aasaasiga ah iyo Adeegaha la siiyo dadka Magan-galyo Raadiska ah iyo Ajaaniib kale oo U qalma adeegaha.